# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 38aad fadhigii 21aad**

**09/012/2018**

**Quraanka: -** Md Xuseen Ismaaciil Yusuf

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md.  Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Ansixinya xeerka ka soo noqday Golaha Guurtida ee Xeerka Maaraynta Qashinka

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaynu u balan sanayn ansixinta Xeerka Maaraynta Qashinka ee Golaha Guurtida ka soo noqday , xoghaynta ha akhrido qodobada ay wax ka beddeleen.

**Qodobka 5aad**

**Masuuliyadaha iyo Waajibaadka Dawladaha Hoose**

**Farqadaha 1aad iyo 13aad oo u dhignaa sidan:**

1. **I**n ay dejiso qorshe cilmiyeysan oo la xidhiidha Maamulka & Maareynta Qashinka & fayadhawrka ee Degmadda.

**13.** In ay qorshe gaar ah u sameeyaan qashinka dareeraha ah ee halista ah sida ka warshadaha, goobaha Caafimaadka, Saliidaha, dharmidabaynta iwm, loona sameeyo kaydin/qaadid & qubitaan u gaar ah.

**Waxa  loo baddelay Sidan:**

**Qodobka 5aad**

**Masuuliyadaha iyo Waajibaadka Dawladaha Hoose**

**1.** **I**n ay dejiso qorshe cilmiyeysan oo la xidhiidha Maamulka & Maareynta Qashinka & fayadhawrka ee Degmadda, **iyada oo la kaashanaysa wasaaradaha  shaqada ku leh.  Sida wasaaradda caafimaadka iyo deeegaanka.**

**13.** In ay qorshe gaar ah u sameeyaan qashinka dareeraha ah ee halista ah sida ka warshadaha, goobaha Caafimaadka, Saliidaha, dharmidabaynta iwm, loona sameeyo kaydin/qaadid & qubitaan u gaar ah **iyada oo la kaashanaysa wasaaradaha ku shaqada leh**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 44

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 25

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 14

Xidhibaanada Aaamusay: 4

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 5aad wuxuu ku ansaxay sidii markii hore Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

**Qodobka 6aad**

**Doorka Wasaarada Caafimaadka**

**Qodobkan 6aad waxa lagu kordhiyay Farqadan oo u dhigan sidan waxaanauu noqonayaa 4 faqradood:**

4. Wasaaradda cafaimaadku waxay dejinaysaa siyaasadda faya-dhawrka ee dalka (**National occupational health policy),** Waaxyaha dawladaha hoose waxay ku shaqayn doonaan siyaasda faya-dhawrka.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in Qodobadda 6aad lagu darro farqad 4aad gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 45

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 29

Xidhibaanada Aaamusay: 14

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 6aad wuxuu ku ansaxay wax ka beddelkii Golaha Guurtidu sameeyeen.

**Qodobka 7aad**

**Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga**

**Qodobkan 7aad waxa lagu kordhiyay 3 faqradood oo dhigan sidan waxaanu noqonayaa 5 faqradood:**

**3**. Wasaaradda deegaanku waxay u xilsaarantahay ilaalinta, maaraynta iyo horumarinta deegaanka Jamhuuriyada Somaliland iyo Bad qabkiisa.

**4**. Wasaaradda Deeganaku waxay kala shaqaynaysaa isla markaana kala talinaysaa dawladaha hoose goobaha qashinka magaalooyinka loogu talo gelay in lagu daadiyo ama lagu gubo.

**5**. Wasaaradda deegaanku waxay si joogto ah u kormeeri doontaa goobaha loo asteeyay in lagu ururiyo qashinka Dareeraha ah iyo adkaha ah.

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in Qodobadda 7aad lagu darro saddex farqadood oo kala ah farqada 3aad , farqada 4aad iyo farqada 5aad gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 46

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 21

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 15

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 7aad wuxuu ku ansaxay sidii markii hore Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

**Qodobka 9aad**

**Wasaarada Ganacsiga, Wershadaha iyo Dalxiiska**

**Doorka Wasaarada Caafimaadka**

**Qodobkan 9aad waxa lagu kordhiyay Farqadan oo u dhigan sidan waxaanuu noqonayaa 4 faqradood:-**

**4**. Wasaaradda ganacsiga, warshaduhu waxay bixinaysaa ruqsadaha dib u farsamaynta qashinka noocyadiisa kala duwan iyo dhoofintiisaba, iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Deegaanka si looga hor tego khataraha ka iman kara dib u isticmaalka qashinka (Recycling).

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in Qodobka 9aad lagu kordhiyo farqada 4aad gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 47

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 0

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 33

Xidhibaanada Aaamusay: 13

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 9aad wuxuu ku ansaxay wax ka beddelkii Golaha Guurtidu sameeyeen.

**<u>Qodobka 33aad</u>**

**Goobaha Qashin Qubka Ama Aasidda**

**Farqadaha 2aad iyo 6aad oo u dhignaa sidan:-**

**2.** Maamulka iyo maaraynta goobta qashin qubka waxaa ka masuul ah Dawlada hoose, isla markaana waxay ku bixin kartaa ruqsad ganacsi ama maamul hadii loo baahdo, iyadoo loo eegayo ka faa'iidaysiga qashinka ee u badalida khayraad dabiici ah iyo mid ganacsiba si loo maareeyo qashinka.

**6**. Dawlada hoose iyadaa ka masuul ah qashinka warshadaha iyadoo qaadis, daabulid, iyo aasidba samaynaysa isla markaana ruqsad ama heshis ayay ku bixin kartaa qaadis, daabulka iyo qubista qashinkaas halista ah nooc kasta oo uu yahay.

**Waxa loo badelay Sidan:-**

**<u>Qodobka 33aad</u>**

**<u>Goobaha Qashin Qubka Ama Aasidda</u>**

**2.** Maamulka iyo maaraynta goobta qashin qubka waxaa ka masuul ah Dawlada hoose, isla markaana waxay ku bixin kartaa ruqsad ganacsi ama maamul marka laga reebo ruqsada dib u farsamaynta qashinka oo ay wasaarada ganacsigu bixinayso iyadoo loo eegayo ka faa'iidaysiga qashinka iyo maarayntiisaba **si waafaqsan xeerka maaraynta deegaanka Lr/79/2017 Qodbkiisa 36aad.**

6. Dawlada hoose iyadaa ka masuul ah qashinka waradhada iyadoo qaadis, daabulid, iyo aasidba samaynaysa isla markaana ruqsad ama heshis ayay ku bixin kartaa qaadis, dabulka iyo qubista qashinkaas halista ah nooc kasta oo uu yahay **si waafaqsan xeerka maaraynta deeganka Qodobaddisa 25aad, 26aad, 27aad.**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 47

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 7

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 26

Xidhibaanada Aaamusay: 13

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 33aad farqada 2aad iyo farqada 6aad wuxuu ku ansaxay wax ka beddelkii Golaha Guurtidu sameeyeen .

**Qodobka 34aad**

**Ruqsada Iyo Heshisyada Hawlaha Adeega Maareynta Qashinka**

**Farqadda 4aad waxay u dhignayd sidan:-**

**4.** Goobaha soo saara qashinka halista ah waxa lala galayaa heshiis ka duwan goobaha soo saara qashinka aan halista ahayn.

**Waxa loo baddelay Sidan:-**

**Qodobka 34aad**

**Ruqsada Iyo Heshisyada Hawlaha Adeega Maareynta Qashinka**

**4**.Goobaha soo saara qashinka halista ah waxa lala galayaa heshiis ka duwan goobaha soo saara qashinka aan halista ahayn **iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Deegaanka iyo Wasaaradda Caafimaadka .**

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 47

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 20

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 17

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 34aad wuxuu ku ansaxay sidii markii hore Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

**Qodobka 62aad**

**Ganaaxa Iyo Ciqaabta Cid Kasta Oo Ku Xad- Guduba Xeerka**

**Oo u dhignaa sidan:**

Cid kasta oo ku gafta qodobadda xeerkan Maaraynta Qashinka iyo fayodhawrka Magaalooyinka Jamhuuriyada Somaliland waxa la horgeyn doonaa maxkamadda awoodda u leh waxayna maxkamaddu ku ganaaxaysaa/ciqaabaysaa tallaabooyinkan.

- **a.** qof kasta oo ku shuba qashin meel aan ku habboonayn waxaa lagu ganaxayaa 50.000 ilaa 200,000 SL SH
- **b.** Cid kasta oo si sharci darro uga ganacsata qashinka waxaa lagu ganaaxayaa 1.000.000 ilaa 3.000.000 SL SH
- **c.** Cid kasta oo isku dhex gurta qashin halis ah iyo qashin aan halis ahayn, qoyan ama qallana waxaa lagu ganaxaya 100.000 ilaa 3.00.000 SL SH
- **d.** Gaadhi kasta oo si sharci darro ah u qaada qashin waxa lagu ganaxayaa 100.000 ilaa 300.000 SL SH
- **e.** Qof kasta oo ka ganacsada bacda xeerkan lagu mamnuucay waxaa lagu ganaaxayaa 500.000 ilaa 1.000.000 SL SH ama xadhig ilaa saddex bilood ah ama labadaba.
- **f.** Qof kasta oo isaga awooda bixin waaya lacagta qashin qaadista waxa lagu ganaaxayaa 50,000ilaa300,000 SL SH
- **g.** Qof kasta oo qashinkiisa u samaysan waaya goob lagu kaydiyo waxaa lagu ganaaxayaa 50,000 ilaa 300,0000 SL SH
- **h.** Qof kasta oo xoolo ku qala meel aan ahayn maslakh geel/lo' iyo adhi waxaa lagu ganaaxayaa 50,000 ilaa 300,000 SL SH
- **i.** Qof kasta oo ku qaba ama ku siidaaaya saliid meel aan ku haboonayn waxaa lagu ganaaxayaa 100.000 ilaa 300.000SL SH
- **j.** Qof kasta oo ku quba qashin dareere halis ah meel aan ku haboonayn waxaa lagu ganaaxayaa 500.000 ilaa 1.000.000SL SH ama xadhig lix bilood ah labada.
- **k.** Qof kasta oo caanaha ku iibiya caagad biyood la isticmaalay waxaa lagu ganaaxayaa 50,000 ilaa 100,000SL SH
- **l.** Qof kasta oo nadaafadda debedda gurigiisa hagaajin waaya waxaa lagu ganaaxayaa 30,000 ilaa 50,000SL SH

- **m.** Qof kasta oo Ku kaaja gidaar ama meel aan haboonayn waxaa lagu ganaaxayaa 50.000 ilaa 100.000SL SH.
- **n.** Qof kasta oo ilaalin waaya nadafadda weelka,Miiska wax iibka ama khudradeed/hilib waxa lagu ganaaxayaa 20,000 ilaa 50,000 SL SH
- **o.** Qof kasta oo ilaalin waaya fayadhowrka Xamaamka waxaa lagu ganaaxayaa 100,000 ilaa 500,000SL SH
- **p.** Qof kasta oo ilaalin waaya fayadhowrka hudheel cunto waxaa lagu ganaaxayaa 500,000 ilaa 1,000,000SL SH
- **q.** Qof kasta oo ilaalin waaya fayadhowrka Rayiisle waxaa lagu ganaaxayaa 100,000 ilaa 300,000SL SH
- **r.** Qof kasta oo suuqa dhexdiisa ku dhaqa xoolo waxa lagu ganaaxayaa 50,000 ilaa 300,000SL SH
- **s.** Qof kasta oo aan meheraddiisu ama gurigiisu aanu lahayn musqul waxa lagu ganaaxayaa 100,000 ilaa 200,000SL SH
- **t.** Qof kasta oo quba bullaacad ama qaada waqti aan habboonayn waxaa lagu ganaaxayaa 500,000 ilaa 1000,000SL SH
- **u.** Cid kasta oo been abuur ku samaysa taariikhda alaab dhacday waxaa lagu ganaaxayaa 3,000,000 ilaa 5,000,000SL SH ama saddex sano oo xadhig ah ama labadaba
- **v.** cid kasta oo iibisa daawo dhacday waxaa lagu ganaaxayaa 3,000,000 ilaa 10,000,000 SL SH ama 3-9 Bilood oo xadhig ah ama labadaba
- **w.** cid kasta oo iibisa cunto dhacday waxaa lagu ganaaxayaa 3,000,000 ilaa 10,000,000 SL SH ama 3-9 Bilood oo xadhig ah ama labadaba
- **x.** cid kasta oo iibisa sharaab dhacay waxa lagu ganaaxayaa 3,000,000 ilaa 10,000,000 SL SH ama 3-9 bilood oo xadhig ah ama labadaba
- **y.** cid kasta oo alaabta loo 3-9 bilood oo xadhig ah ama labadaba isticmaalo bilicda dadka (Cosmatics) waxaa lagu ganaaxayaa 3,000,000 ilaa 10,000,000 ama 3-9 bilood oo xadhig ah ama labadaba

- **z.** Cid kasta oo iibisa alaab kale oo dhacday waxaa lagu ganaxayaa 3,000,000 ilaa 10,000,000 SL SH ama 3-9 bilood oo xadhig ah ama labadaba
- **aa.** cid kasta oo biyo wasakh ah ku qubta meel aan ku habboonayn waxaa lagu ganaaxayaa 50,000 ilaa 100,000SL SH
- **bb.** Gaadiidkasta oo ciidda ka qaada meel aan ku habboonayn waxaa lagu ganaaxayaa 300,000 ilaa 500,000 ama 3 bilood oo xadhig ah ama labadaba.

**Waxa loo badelay sidan:-**

## Qodobka 62^aad

## Ganaaxa Iyo Ciqaabta Cid Kasta Oo Ku Xad- Guduba Xeerka

Cid kasta oo ku gafta qodobadda xeerkan Maaraynta qashinka iyo fayodhawrka Magaalooyinka Jamhuuriyadda Somaliland waxaa Dawladdaha hoose ku ciqaabi doonaan ganaaxyadda hoos ku xusan, iyada oo qofka caadaysta la hor-geyn doono maxkamadda awoodda u leh, si waafakhsan Xeerarka (Xeerka Maaraynta Qashinka Xeer. No.83/2018), Xeerka Maaraynta Degaanka (Xeerka Maataynta Degaanka Xeer No.79/2018) & Xeerka Habka Ciqaabta Guud:-

| S/no | Faah-faahin | Ganaaxa |
|---|---|---|
| 1. | Qofka ku shubo Qashin meel aan ku Haaboonayn waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 200,000 Sl Sh |
| 2. | Cid kasta oo si sharci daro ah uga ganacsata Qashinka waxaa lagu ganaaxayaa | 300,000 ilaa 3000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah(caadeyste). |
| 3. | Cid kasta oo isku dhex gurta Qashin halis ah iyo qashin aan halis ahayn,qoyan ama qalalan waxaa lagu ganaxaya | 500,000 ilaa 300,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah(caadeyste). |
| 4. | Gaadhiga si sharci daro ah u Qaada/Quba Qashin waxaa lagu ganaaxayaa | 500,000 ilaa 1,000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah(caadeyste). |
| 5. | Qof kasta oo ka ganacsada Bacda deeganka waxyeesha sida Miikada waxaa lagu ganaaxayaa | 500,000 ilaa 3000,000 SL SH<br>3-9 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 6. | Qof kasta oo isago awooda bixin waaya lacagta qashin qaadista waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 300,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 7. | Qof kasta oo Qashinkiisa u samaysan waayaa weel ku haboon waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 300,000 SL SH |
| 8. | Qof kaste oo xoolo ku qala meel aan ahayn maslakha geel /lo’ iyo adhi waxa lagu ganaaxayaa | 100,000 ilaa 1000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |

| | | |
|---|---|---|
| 9. | Qof kasta oo ku quba ama ku sii daaya saliid meel aan ku haboonayn waxa lagu ganaxayaa | 200,000 ilaa 1000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 10. | Qof kasta oo ku quba/biyo raaciya qashin dareere halis ah meel aan ku habonayn waxaa lagu ganaaxaya | 500,000 ilaa 1000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah(caadeyste). |
| 11. | Qof kasta  oo Caanaha ku iibiya caagad Biyood la isticmaalay waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 100,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah(caadeyste). |
| 12. | Qof kasta  oo Nadaafada  debedda gurigiisa hagaajin waaya waxaa lagu ganaaxayaa | 30,000 ilaa 50,000 SL SH |
| 13. | Qof kasta oo ku kaaja gidaar ama meel aan kuhaboonayn waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 100,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 14. | Qof kasta oo ilaalin waaya Nadaafadda weelka miiska waxaa iibka ama khudradeed /hilibka waxaa lagu ganaaxayaa | 20,000 ilaa 50,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 15. | Qof kasta oo ilaalin waayaa fayodhawrka Xamaamka waxaa lagu ganaaxayaa | 100,000 ilaa 500,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 16. | Qof kasta oo ilaalin waayaa fayodhawrka hudheeladda cunto/macmacaanle iwm & kadhka caafimaadka shaqaalahoda waxaa lagu ganaaxayaa | 500,000 ilaa 1000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 17. | Qof kasta oo ilaalin waaya fayadhawrka Rayiisle waxaa lagu ganaaxayaa | 100,000 ilaa 300,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 18. | Qof kasta oo suuqa dhexdiisa ku dhaqa xoolo neefkii waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 500,000 SL SH<br>3-9 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 19. | Qof kata oo aan meheraddisu ama gurigiisu aanu lahayn musqul waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 300,000 SL SH |
| 20. | Qof kasta oo quba Bullaacad ama gaadhi qaada waqti aan habboonayna waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 500,000 SL SH |

| | | |
|---|---|---|
| | | 3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 21. | Cid kasta oo been abuur samaysa taariikhda alaab dhacday waxaa lagu ganaaxayaa | 3000,000 ilaa 10,000,000 SL SH<br>1-2 sanno oo xadhig ah (caadeyste). |
| 22. | Cid kasta oo iibisa daawo dhacday waxaa lagu ganaaxayaa | 300,000 ilaa 10,000,000/- 3-9 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 23. | Cid kasta oo iibisa Raashin/Cunto dhacday waxaa lagu ganaaxayaa | 300,000 ilaa 10,000,000/- 3-9 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 24. | Cid kasta oo iibisa sharaab dhacay waxaa lagu ganaaxayaa | 300,000 ilaa 10,000,000/- 3-9 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 25. | Cid kasta oo iibisa Cosmatics/Accessories/rinji ama alaab dhacay waxaa lagu ganaaxayaa | 300,000 ilaa 10,000,000/- 3-9 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 26. | Cid kasta oo iibisa qalab kale oo dhacday sida qalabka baadhista waxaa lagu ganaaxayaa | 300,000 ilaa 10,000,000/- 3-9 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 27. | Cid kasta oo biyo wasakh ah ku qubta meel aan ku habooynayn waxaa lagu ganaaxayaa | 50,000 ilaa 300,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 28. | Gaadiid kasta oo ciida ka qaada meel aan ku haboonayn oo sharci daro ah waxa lagu ganaaxaya | 300,000 ilaa 500,000 SL SH ama 3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 29. | Meheradaha alaabooyinka dibada dhiga sida geerashyada iwm ee khariba bilicda/caafimadka waxaa lagu ganaaxayaa | 500,000 ilaa 2000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 30. | Baabuurta dhuxusha ee bilaa jawaanka ee halista ku ah caafimaadka & bilicda waxa lagu ganaaxayaa | 500,000 ilaa 2000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 31. | Qashinka shirkadaha dhismaha & waddo goyn sharci daro waxaa lagu ganaaxayaa | 1000,000 ilaa 10,000,000/- 3-9 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |
| 32. | Leebaajo meel aan ku haboonayn waxaa lagu ganaaxaya | 500,000 ilaa 2000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |

| | | |
|---|---|---|
| 33. | Qodis bulaacad meel aan ku haboonayn/sharci daro ah waxaa lagu ganaaxayaa | 1000,000 ilaa 3000,000 SL SH<br>3 bilood oo xadhig ah (caadeyste). |

**Goddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen Gacanta ha taagaan:-

Xildhibaanada fadhiya: 47

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 33

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 3

Xidhibaanada Aaamusay: 10

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 62$^{aad}$ wuxuu ku ansaxay sidii markii hore Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

## Codka Guud ee Ansixinta Xeerka Maareynta Qashinka

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 5$^{aad}$ ilaa Qodobadda 62$^{aad}$ xildhibaanada ogol sidii lagu kala codeeyey gacanta ha taagaan.

Xildhibaanada fadhiya: 47

Xildhibaanada ogol sidii loo kala codeeyey: 38

Diiday: 0

Xidhibaanada Aaamusay: 8

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 62$^{aad}$ wuxuu ku ansaxay sidii markii hore Golaha Wakiiladu ku ansixiyeen.

**Soo jeedin Xildhibaan Cbadiraxmaan Yuusuf Cartan**

1. In Qodobka 62aad halka a,b,c laga dhigo tiro sida 1, 2, ilaa sii socodka

Waxa kale oo la soo jeediyey in Qodobka 9$^{aad}$ farqada 4$^{aad}$ la eego ma Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadahaa mise Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Deegaanka

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| **-----------------------------------------------** | **----------------------------------------** |